

Dabaalyahan wax badbaada, iska jir!

Ciyaaraha biyaha, sida dabaasha, dhex-jeexidda biyaha, doon-raacidda, qofka doonta lagu jiido waa wax cajiiba oo farxad leh, laakiin waxay khatar u noqon karaan da'da dadka oo dhan. Sanad kasta carriga Maraykanka waxa ku hafta ugu dhawaan dad gaaraya 4,000, kuna jiraan ku dhawaan1,000 caruur 14 jir ama ka yar. Caruurta da'doodu tahay 1-9, waa hafashada sababta labaad ee dhimasha ama dhaawac.

Ciidanka Ilaalada Xeeabaha Maraykanka waxa uu qiiyasay in 10kii qof oo hanfataba 9 ma xiran qalab qalabka sabbaynta-inta badan loo yaqaanno suudka nafta.

Ogow xaaladaha cimilada deegaankaada iyo duurka inta aadan aadin dabaasha doonta.

Sanadkii 2008, waxa dhacday 33 hafasho (doon aan ahayn) ee dhimasho leh ayaa Minnesota ka dhacday. 355 waxay ku hafteen MN ilaa 2000kii.

www.ci.minneapolis.mn.us/fire

Xiriir la leh

www.fire.state.mn.us

Ammaanka Biyaha

Maalin kale ee xeebta lagu raaxaysto...

Maxan qaban karaa?

Si ahmiyad weyn leh ayaad hoos ugu dhigi kartaa tirada hafashada adiga oo raaca xeerkan:

- Adeegso qalabka sabbaynta ay ansixisay Ilaalada Xeebaha Mareykanka (jaakadda nolosha), marka doonta la racayo, iyado aan loo eegayn dherarka masaaxadda, cabbirka doonta ama kartida dabaasha ay leeyihiin baxaarida.
- Hubi in dadka qaangaarka ah ay si joogta ah indha ugu hayaan caruurta dabaalanaya, ku ciyaaraya ama ku mayranaya biyaha ama dooni saaran. Xadeeh hawlgalka biyaha meel, loo calaameeyay, inta badan lagu calaameeyo qalab sabbaynaya (buoys). Wax ha akhrin, turub ha ciyaarin, talefoon ha ku hadlin iyado ay kaa jeedinayaan halka caruurta aad ka kormeri lahayd agagaaraha biyaha.
- Marna ha dabaalaan keligaa ama meelo aan kormeer lahayn. Caruurtaada bar in ay markasta la dabaashaan rafiiq.
- Ka fogee caruurta yar-yar baaldiyada ay ku jiraan dareere, shan galaan qaadka warshadaha oo ah khatar gaar ahaaneed leh. Baaldiyada faaruqi marka dadka guriga uga dan dhammaystaan. Dhallaanka ama socod-baradka waxay ku hafan karaan hal inj oo biyo aha.
- Marna ha cabin khamri dabaasha ka hor ama inta aad dabalanaysid, doonta saarantahay ama biyaha lagugu jiidayo. Marna ha cabin khamri inta aad caruurta biyaha ku hareeraysan kormeeraysid.
- Dhllinyarada bar khatarta ay ledahay cabidda khamriga iyo dabaasha, doon-raacidda ama biyo jiidka.
- Si looga gaashaanto margashada marna xanjo ha calalin, wax ha cunin inta aad dabaalanaysid, qusaysid ama biyaha ku ciyaareysid.
- Baro dabaasha! Iska diiwaangeli naftaada iyo caruurtaadaba fasallada dabaasha, oo kordhiya xirfadaha iyo wacyigalinta looga baahanyahay ammaanka dabaasha.
- Markasta lahaw qaangaar wax indh-indheeya iyo kormeere hawlgalka biyaha *waxba ma samaynayso wax uu yahay da'da ama heerka xirfadaha qofka dabaalanaya.*
- Baro CPR soo-noolaashaha wadnaha-sambabada Gargaarka Koobaadand.

- HA ISTICMAALIN buufinta gargaarka dabaasha oo hawadu ka buuxdo (water wings) meel nolosha caruurta looga daaryeela. Kuwani waa bambolo leh qasabado balastiig ah oo si sahlan loo dalooli karo ama furmi kara.
- Hubi marka hore dhererka hoose ee biyaha inta aadan dhexgalin. Laanqeyrta Cas ee Mareykanka waxay ku talisay in ay noqdaan ugyu yaraan 9 gacmood dhererka hoose biyaha lagu quuso ama lagu soo boodo. Xasuuso in biyaha furan markasta ay xaddidantahay wax aragga ay leeyiihin, iyado xaaladuhu ay isbaddali karaan saacad kasta. Waqtigan lagu jiro inta badan lama saadaali karo, socodka xawaaraha, iyo isbaddalka deg-degga ee jahada. Hirka xooggan ee biyaha ayaa gayn kara xitaa xeel-dheerayaasha dabaasha meel ka fog xeebta.

Haddii gurigaada aad ku leedahay barkadda dabaasha:

- Ku wareeji barkaddaada dabaasha dayr affar geesa oo leh irdo qataar is-xira oo is-fura leh. Deyrka waa inu ahaada ugu yaraan affar cagood dhererkiisu iyo inu gebiahaanba ka go'anyahay guriga iyo meelaha lagu ciyaaro ee daaradda.
- Ka ilaali in caruurtu ay si toosa u gasho barkadda dabaasha.
- Ku rakib telefoon barkadda agteeda. Baro sida loola xiriiri karo adeegyada caafimaadka deg-degga ee degaankaada.
- Si deg degg bambolooyinka uga qaad barkadda marka la isticmaalo dabadeed. Waxa sabbaynay, kubbadaha iyo bamoloyinka caruurta oo kale waxay ku dhalin karaan caruurta in ay u janjeersadan oo shil ahaana barkadda ugu dhacaan.
- Meel dhow caruurta isticmaaleysa barkadda ka kormeer, kuwa kalana ku boorri in ay sidaaso kale sameeyaan.

Masuuliyadda Gaar ahaaneedl

Giddigeen xill baa naga saaran hubinta ammaanka nafteenna iyo kuwa nagu hareeraysan. Dhigidda tusaale wacan iyo ku dhaqanka si masuuliyadnimo waxay naga caawimaysaa in aan ka helno hawlaheenna tamashlaha khatar la'aan.